



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 7aad
Taariikhda: 05 November, 2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:15 AM	Saacadda uu Xirmay: 04: 07 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde).	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: 1. Wasiir Wasaaradda Gaashaandhigga, Mudane Axmed Macallin Fiqi oo uu wehliyo Wasiiro dowlaha wasaaradda Xildhibaan Cumar Cali Cabdi iyo Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, Sareeye Gaas Odawaa Yuusuf Raage.	Ajedayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Hor imaansho Gole Wasaaradda Gaashaandhiga iyo Taliska Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

Furitaanka Kulanka:

Senator Sareedo Maxamuud Jeeyte ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde). ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde) ayaa u yeeray Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga XFS iyo Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed si ay Golaha uga siiyaan warbixin ku saabsan hawlaha shaqo ee Wasaaradda iyo Taliska Ciidanka. Wasiirka Gaashaandhigga, Axmed Macallin Fiqi, ayaa ka warbixiyay xaaladda guud ee amniga dalka, waxqabadka Wasaaradda, guulaha laga gaaray dagaalka ka dhanka ah argagaxisada. Sido kale Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka, Sareeye Gaas Odawaa Yuusuf Raage, ayaa ka warbixiyay dib-u-habeynta, tayeynta, tababarka iyo qalabaynta Ciidanka, iyo hawlgallada ballaaran ee dalka ka socda. Warbixinada kaddib, 16 senator ayaa su'aalo iyo soojeedin ka yeeshay warbixinada wasiirka iyo Taliyaha. Intaas kaddib, wasiirka iyo Taliyaha ayaa ka jawaabay dhammaan su'aalihii ay Xubnaha Golaha Aqalka Sare ka weydiiyeen warbixinada.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.

Ugu dambayntii, Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde) ayaa kulanka soo xiray sacadu markay ahayd **04: 07 PM.**

DHAMAAD